XOGTA KOOFID-19

Qaado Talaalka. Waa ammaan oo fudud.

Saxiix markey tookadaada tahay.
Imow ballantaada.
La soco qiyaastaada labaad.

Tallaallada KOOFID-19 waa badbaado, waxtar leh oo badbaadinaayana nolosha. Waxay kaa caawinayaan kana hortayaa inaad qaado cudurka waxayna kaa ilaalinaysaa inaad si daran u xanuunsato haddii aad qaaddid.

Qof kasta oo doonaya tallaal wuxuu helayaa. Dadka waxaa lagu tallaalaa wajiyo kala duwan si markaa kuwa halista ugu jira ayna isbitaal galaan ama ay u dhintaan ayaa helaya marka hore. Waqtiga saxda ah wuxuu kuxiranyahay bixinta saadka talaalka.

Dalbo tallaalkaaga lacag la'aanta ah
Soo ogow goorta aad u qalanto inaad ka hesho tallaal alberta.ca/vaccine. Markay tahay tookadaada, qabso ballantaada adoo adeegsanaya habka saxda ah ee xaaladdaada.

- Raadi farmashiye kaqeybgala
- Ka dalbo khadka tooska ah Adeegyada Caafimaadka ee Alberta
- Wac Xiriirka Caafimaadka 811

Haddii aadan haysan kaarka Daryeelka Caafimaadka ee Alberta, waa inaad ballan ka qabsato adoo adeegsanaya Adeegyada Caafimaadka Alberta khadka tooska ah ama wac 811.

Ma u baahan tahay caawimaad?
Wac 811 si aad u ogaato goorta aad u qalanto saad ballan u qabsato. Adeeggan waxaa lagu heli karaa 240 luqadood.

Ma u baahan tahay gaadiid?
Wac 211 si aad u hesho caawimaad gaadiid ku geeya kana soo qaada ballanta tallaalkaaga.

Yaa u baahan in la tallaalo?
Qof kasta oo is tallaali kara, waa inuu is tallaalaa.
In kasta oo dadka waayeelka ah ay halis sare ugu jiraan jirro daran, haddana tallaallada waxaa loogu talogalay dadka da'da yar iyo kuwa caafimaadka qaba. Waxay kaa caawineysaa inaad dhisto habkaaga difaaca jirka si aad ula dagaallanto cudurada una difaacdo kuwa hareerahaaga ah.

Dadka ka soo bogsaday KOOFID-19 waa inay sidoo kale is tallaalaan si kor loogu qaado difaaca jirka.

Yaan la talaalin?
La tasho dhakhtar marka hore haddii aad su'aalo ka qabtid tallaalka ama xaaladahaaga caafimaad.

Ha is tallaalin haddii aad ka yar tahay da'da 16 ama aad xasaasiyad daran ku leedahay mid ka mid ah maaddooyinka tallaalka. Liistada oo dhameystiran waxaa laga heli karaa alberta.ca/vaccine.

Maxaa dhacaya ka dib marka aad is tallaasho
Tallaalka waxaa lagugu durayaa garabkaaga kore, sida tallaalka hargabka.

Intaa ka dib, waxaad la kulmi kartaa waxyeelooyin khafiif ah sida casaan, barar ama xanuun goobta la durayo, qandho yar ama madax xanuun. Kani waa habkaaga difaaca jirka oo la shaqeynaya tallaalka si loo dhiso unugyada difaaca jirka. Calaamadahan waa inay baxaan maalmo yar gudahood.

Tallaallada badankood waxay u baahan yihiin laba qiyaasood. Waxaa laguu tixgelin doonaa inaad si buuxda u tallaasho 14 maalmood ka dib qiyaastaada ugu dambeysa.

Xaqiiqda hel

- Mahada waxaa leh wadashaqaynta adduunka, tallaalka KOOFID-19 si dhakhso leh ayaa loo soo saaray iyada oo aan waxyeello loo geysan nabadgelyada. Tallaal kasta oo la ansixiyay wuxuu la kulmay heerarka adag ee Caafimaadka Kanada ee badbaadada, tayada iyo waxtarka. Dunida oo dhan, tobanaan milyan oo dad ah ayaa horey u qaatay tallaalka.
- Tallaalka waa mid aan khasab ahayn, laakiin waa muhiim in dadka kale ee hareerahaaga ah laga dhigo kuwo nabdoon. Markaad is tallaasho, waxaad ilaalineysaa dadka nugul waxaadna ka caawineysaa bulshadayadu inay yeeshaan "difaac aad u adag" oo ku saabsan cudurkan faafa.
- Istallaal sida ugu dhakhsaha badan ee aad awooddo, iyadoo aan loo eegin tallaalka la bixiyo. Tallaalku wuxuu jirkaaga ka dhigaa mid awood

©2021 Government of Alberta | Published: March 2021

Alberta

Classification: Protected A

Qaado Talaalka. Waa ammaan oo fudud.

badan iyadoo la dhisayo unugyada difaaca jirka si looga hortago loona dagaallamo cudurrada. KOOFID-19 waa feyras cusub sidaa darteed qofna ma laha difaac dabiici ah. Aad ayey uga badbaado badan tahay uguna waxtar badan tahay in la iska tallaalo marka loo eego infekshanka.

- Tallaalka kuuma keenaayo 'KOOFID-19'. Kumana jiraan fayraska dhabta ah.
- Weli waad iska hubin kartaa cudurka ka dib marka aad is tallaasho. Tallaalku wuxuu yareynayaa in aad si daran u xanuunsato, una baahato tahay isbitaal dhigid ama aad u dhimato KOOFID-19.

Qaadashada tallaalku macnaheeda maahan in masiibada ay dhammaatay. Sii wad inaad raacdo talaabooyinka caafimaadka bulshada xitaa ka dib marka aad istallaasho. Weli waad qaadi kartaa fayraska waxaadna qaadsiin kartaa dadka kale ee aan istalaalin.

Ilaha la tarjumay waxaa laga heli karaa Af-Soomaali, Carabi, 简体 中文, 繁體 中文, Español, Français, हिन्दी, 한국어, Persian, ਪੰਜਾਬੀ, Tagalog, Tiếng Việt iyo Urdu oona laga helo alberta.ca/CovidTranslated, ama wac 811.

Adeegyada kale ee taageerada KOOFID-19

- Haddii aad leedahay calaamado ama aad ogaatay inaad soo qaaday KOOFID-19, waa inaad guriga joogtaa oo aad iska baarto. Ka ballanso baaritaan khadka tooska ah ama wac 811.
- Taageero maaliyadeed ayaa la heli karaa haddii aadan awoodin inaad shaqeyso maadaama aad jiran tahay, lagaa doonayo inaad go'doon gasho, ama aad daryeesho qof karantiil ku jira.
- Qolal hoteel oo lacag la'aan ah iyo taageero maaliyadeed ayaa la heli karaa haddii ay qasab tahay in lagu karantiilo KOOFID-19 dartii laakiin kuma sameyn kartid gurigaaga dhexdiisa. Wac 211 si aad u hesho xog dheeraad ah.

· Kooxaha Daryeelka KOOFID waxay la shaqeynayaan magaalooyinka Kaalgari (Calgary) iyo Edmonton si dadka loogu xiro ilaha, loo siiyo macluumaad loona qeybiyo maaskarada, fayodhowrka iyo ilaha la tarjumay.

©2021 Government of Alberta | Published: March 2021

Alberta

Classification: Protected A